# KU SOO DHAWOOW CHILDREN'S MERCY

## Xaquuqda Waalidka iyo Balamaha aan Idiin Qaadnay



Children's Mercy KANSAS CITY

## Himilooyinka Isbitaalka

Xeerarkaan qofkasta ayay qabanayaan, ayna ku jiraan shaqaalaha, bukaanka, qoysaska iyo martida.

### Samee:

- Raac xeerarkeena isbitaalka:
- Ka dhig isbitaalka mid amaan ah oo nasiino badan.
- Kula dhaqan qof kasta xushmad iyo sharaf.
- Ilaali sirta iyo qarsoodiga dadka kale.
- Xiro dhar aan ahayn kuwo xun ama colaad muujiaaya oo xushmadna siinaaya dadka kale.
- Qadari farqiyada dadka kale, ayna ku jiraan da'dooda, midabkooda, dhaqankooda, isirkooda, aqoonsigooda jinsi ama dareen, luuqada, wadanka, jirka, dhimirka ama naafada kale, isirkooda, diintooda, galmadooda, dookhooda galmada, xaaladooda dhaqan dhaqaale ama aasaasyada kale ee sharcigu difaacaayo.

### Ha:

- Takoorin, u cagajuglayn ama dhibin qofna.
- Ha adeegsan luuqad cay ama xaasidnimo ah.
- Ha adeegsan xadgudub jireed ama shucuureed.
- Ha keenin ama ku adeegsan hub ama daroogo sharci daro ah goobaheena ama dhismeyaasheena.
- Haku adeegsan tubaako, sigaar ama khamri goobaheena ama dhismeyaasheena.
- Ha xadin ama burburin hantida isbitaalka ama alaabta dadka kale.
- Haku shaqeyn qalab caafimaad oo isbitaalku leeyahay. Shaqadaan waxaa keliya awood u leh shaqaalaha fasaxa haysta.
- Ha gelin aagaga la xadiday.
- Ha qaadin sawirada, muuqaallada ama duubisyada shaqaalaha adiga oo aan ogolaansho ka helin.

## Xaquuqaha Bukaanka

### Balamaha aan u qaadnay bukaanadeena:

- Muhiim ayaad noo tahay.
- Waxaad xubin ka tahay kooxdaada daryeelka caafimaadka.
- Waxaad si saaxiibtinimo leh ugala hadli kartaa kooxda daryeelkaaga caafimaadka daryeelkaaga iyo badqabkaaga. Daryeelkaaga iyo badqabkaaga ayaa ah yoolka ugu muhiimsan.
- Waxaad na waydiin kartaa su'aalaha ugu badan ee aad jeclaan lahayd. Waxaad codsan kartaa turjumaan xili kasta.
- Waxaad noo sheegi kartaa sida aad dareemayso. Waxaan kuu sheegi doonaa runta.
- Waan ku dhagaysan doonaa.
- Waxaan kaala hadli doonaa daryeelkaaga anagoo kugula hadlayna luuqad aad fahmayso.
- Waxaan kaa caawin doonaa inaad samayso waxa aad u baahan tahay si aad u kobacdo waxna u barato.
- Waxaan kuula dhaqmi doonaa sida ugu dabacsan

ee suuragalka ah marka aan ku daryeelayno.
- Waxaan dabooli doonaa jirkaaga inta ugu badan ee aan awoodno.
- Waxaan ku waydiin doonaa haddii waxyeelo kugu dhacdo. Waxaan iskudayi doonaa inaan kaa caawino inaad u bogsato sida ugu dhakhsaha badan oo badqab leh sida ugu haboon.
- Waxaan kaa caawin doonaa inaad sii wado samaynta waxyaabaha muhiimka kuu ah adiga, qoyskaaga iyo diintaada.
- Waxaan kaa caawin doonaa inaad barato sida loo daryeelo naftaada.

### Waxaan sidoo kale:

- Kuu sheegi doonaa cida aan nahay.
- Waxaan sharixi doonaa shaqadeena.
- Waxaan kaala hadli doonaa sababta aad halkaan u joogto.
- Waxaan kuu sharixi doonaa sida xaaladu noqon karto.
- Waxaan u sheegi doonaa dhakhtarkaaga in aad isbitaal ku jirto.
- Waxaan u sheegi doonaa saaxiib ama xubin qoyskaaga ah in isbitaal lagu dhigay (18 sano ama ka wayn, marka aad codato).
- Waxaan ku siin doonaa kalsooni sida ugu macquulsan.
- Waxaan kuu sheegi doonaa waxa ku caawin kara iyo waxa aan aaminsan nahay inuusan ku caawinayn.
- Waxaan ku siin doonaa xogta aad u baahan tahay si aad go'aanno uga gaarto daryeelkaaga.
- Waxaan ku siin doonaa daryeel wanaagsan waana ku qadarin doonaa ayadoo aan loo eegin:
- Da'daada, jinsigaaga, aqoonsigaaga jinsiga iyo dareenka.
- Midabka maqaarkaaga, isirkaaga iyo qoomiyadaada.
- Meesha aad ku dhalatay.
- Luuqada aad ku hadasho.
- Fikradahaaga iyo dhaqankaaga.
- Waxa aad ku samayn karto ama aadan ku samayn jirkaaga iyo maskaxdaada.
- Sida aad u eegtahay.
- Cida qoyskaagu yahay iyo cida aad jeceshahay.
- In adiga ama qoyskaagu dhiibi karo qarashka daryeelka.

### Xuquuqaha Dheeriga ah:

- Qoyskaaga iyo saaxiibadaada ayaa kula joogi kara marka xeerarka isbitaalku sheegaan inay caadi tahay iyo marka aad dooneyso inay kula joogaan.
- Haddii aan kuu yaboohno daraasad cilmi baaris, waad aqbali kartaa ama waad diidi kartaa. Inaad "maya" tiraahdo ayaan badeli doonin sida aan kuu daryeelno.
- Waxaan kaa caawin doonaa samaynta qorsheyaal haddii adiga iyo qoyskaagu aad doorataan inaad guriga aado ama aadaan isbitaal kale, ilaa inay waxyeelaynayso maahee caafimaadkaaga ama badqabka.
- Adiga iyo waalidkaaga ayaa arki kara diiwaankaaga caafimaadka marka sharcigu fasaxaayo. Waan kaa caawin doonaa arintaan.
- Adiga iyo waalidiintaada ayaa codsan kara caawimaad ku aadan bixinta qarashka daawadaada ama daryeelka caafimaadka.
- Haddii aad jirto 18 ama ka wayn tahay aadna awoodo inaad go'aannada naftaada u gaarto, waxaad abuuri kartaa Dardaaranka Horey Loo sii Qoro. Dardaaranka Horey loosii Qoro ama qorshaha hadalka ah ayaa noo sheegaaya noocyada daawaynta aad doonayso ama aadan dooneyn. Wuxuu sidoo kale noo sheegayaa cida kuu gaaraysa go'aannada haddii aadan awoodin inaad adigu noo sheegto. Haddii aad dooneyso, waxaan kaa caawin doonaa abuurista Dardaaranka Horey loosii Qorey.
- Haddii aad jirto 18 sano ama ka wayn tahay aadna awoodo inaad go'aannada iskaa u gaarto, waxaad xaq u leedahay inaad aqbasho ama diido qayb kasta oo kamid ah daawayntaada caafimaad. Haddii aad ka yar tahay 18 sano aadna dooneyso inaad diido qayb kamid ah daryeelkaaga, waxaan arintaan kala hadli doonaa adiga iyo dadka kale haddii loo baahdo.
- Haddii aad jirto 18 sano ama ka wayn tahay aadan awoodin inaad go'aannada iskaa u gaarto, waxaan la hadli doonaa qareenkaaga sharciga ah ama wakiilka si uu u gaaro go'aannada maslaxadaada koobaad ku jirto.
- Waxaad codsan kartaa hage kugu sameeya baaritaan jireed. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan falka ama baaritaanka shaqaalaheena, fadlan noosoo sheeg arintaan. Waxaad sidoo kale soo sheegi kartaa laynka tooska ah adeegyada difaaca ee gobalka ama wakaaladaha halkaan lagu sheegay.

## Caawimaada Dhaqaalaha

Ilmo kasta oo jiran wuxuu u qalmaa daryeel. La taliyaasha dhaqaalaha ayaa awoodi kara inuu ka caawiyo qoysaska helitaanka dhaqaale ka caawinaaya inay bixiyaasha qarashaadka caafimaadka. Children's Mercy waxay caawimaad dhaqaale siisaa dadka buuxiya shuruudaha xeerka caawimaada dhaqaalaha. La taliyaasha dhaqaalaha ayaa halkaan u jooga inay ku caawiyaan haddii aadan haysan caymis ama aad aamisan tahay inaad dhibaato ku qabi doonto bixinta qaybta caymiska, joogtada caymiska, lacagaha caymisku jarto ama lacagaha kale ee uusan caymisku daboolin. La taliye dhaqaale ayaa u baahan inuu xogta qaar kaa helo si uu u go'aansho inaad u qalanto caawimaad dhaqaale iyo inkale.

Qaar kamid ah shuruudaha muhiimka ah waa:

- Waa inaad dagan tahay gobalka Kansas ama Missouri.
- Waa inaad haysataa gunnada qoyska (oo lagu dabaqaayo tirada qoyska) oo ka yar ama u dhiganta 300% heerarka Fakhriga Federaalka,
- Waa inaad isticmaashay dhammaan khayraadka dhammaan barnaamijyada kale (uuna ku jiro Medicaid).

Children's Mercy waxay ku jirtaa inta badan qorsheyaasha caymiska.

Fadlan la xiriir caymiskaaga ama bixiyaha daryeelkaaga maareysan si aad u xaqiijiso caymiska oo booqo **choosechildrensmercy.org** si aad u hesho xog dheeri ah.

Si aad u hesho caawimaad dheeri ah oo dhaqaale, fadlan booqo webseedkeena (**childrensmercy.org/financialcounseling/**). Dhammaan foomamka Caawimaada Dhaqaalaha ee ku qoran luuqadaha Ingiriiska, Isbaanishka, Soomaali, Fiyeednaamiis, iyo Burmiis. Si aad ula xiriirto La taliyaha dhaqaalaha: iimeelka admfc@cmh.edu ama taleefanka (816) 234-3567.

## Xiriir Macno Leh

Kaaliyaasha bilaashka ah adeegyada la heli karo lana siiyo dadka naafada ah si ay noola hadlaan si wax ku ool ah, sida:

- Turjumaannada luuqada naafada oo xirfad leh
- Xogta qoran oo ku qoran qaabab kale

Adeegyada luuqada oo bilaash lagu siinaayo dadka luuqadooda hooyo aysan ahayn Ingiriis, sida:

- Turjumaannada caafimaadka ee xirfada leh
- Xogta ku qoran luuqadaha kale

Si aad u hesho xog dheeri ah fadlan nagala soo xiriir (816) 234-3474.

## U doodaha Bukaanka

U doodeyaasha Bukaanka ee Children's Mercy ayaa ah isku xirayaasha bukaannada, qoysaska iyo shaqaalaha bulshada. Waxay fududeeyaan xiriirka waxayna shaqaalaha ka qaybgeliyaan xal u helida arimaha la xiriira khibrada bukaanka, iyo sidoo kale waxay aqoonsadeen fursadaha hormarinta ururka. U qareemida bukaanka ayaa la heli karaa si xal loogu helo walaacyadaada iyo, haddii loo baahdo, kaa caawinaaya gudbinta cabashada. Gudiga cabasada ayaa dib u eegis ku samayn doona cabasho kasta waxayna ku siin doonaan jawaab qoraal ah. Jawaabta qoraalka ah waxay ka koobnaan doonta magaca qofka aad kala xiriirayso isbitaalka, talaabooyinka la qaadaayo si loo baaro cabashada, natiijooyinka cabashada iyo taariikhda dhamystirka cawsha cabashada. Waxaad kala xiriiri kartaa u doodaha bukaanka lambarka (816) 234-3119 ee Missouri ama (913) 696-8872 ee Kansas ama iimeelka oo ah patientadvocate@cmh.edu.



## Waajibaadkaaga ka bukaan ahaan

Waxaa jira waxyaabo keliya adigu aad noo sheegi karto. Si aan kuu siino daryeel wanaagsan oo badqab leh, waa muhiim inaad noo sheegto:

- Sababta aad halkaan u timid.
- Sidee ayaad dareemaysaa.
- Hadii aad xanuun dareemayso iyo meesha ku xanuunaysa.
- Maxay dhinacyada kale sameeyeen si ay kaaga caawiyaan inaad bogsooto.
- Waxa adiga iyo qoyskaagu aad samaysaan marka aad guriga joogtaan si xanuunku kaaga yaraado.
- Haddii aadan fahmin wax.
- Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan daryeelkaaga.
- Haddii uu jiro wax aad niyada ku hayso.
- Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo qorshaha daryeelkaaga ama inaadan lumin balantaada.

## Su'aalo ama Walaacyo?

Haddii aad aaminsan tahay in aanaan balanteenii kasoo bixin, fadlan noo sheeg si aan iskugu dayno inaan wax saxno. Waxaad sidoo kale codsan kartaa inaad la hadasho Gudiga Anshaxa xiliga aad doonto haddii aad dhibaato ku qabto go'aannada daawaynta.

**Inkastoo aan samayn doono dedaal kasta si aan xal ugu helno walaacyadaada, waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa mid ama waxka badan oo wakaaladaha soo socda ah:**

**Missouri Department of Health Hospital Licensing and Certification (Waaxda Ruqsada iyo Shahaadada Isbitaalka u qaa-bilsan Waaxda Caafimaadka ee Missouri)**
P. O. Box 570
Jefferson City, MO 65102
Taleefanka: (573) 751-6303
Fakiska: (573) 526-3621

**Missouri Board of Healing Arts (Gudigga Farshaxanka Daawayn ee Missouri)**
P.O. Box 4
Jefferson City, MO 65102
Taleefanka: (573) 751-0098
Fakiska: (573) 751-3166

**Missouri State Board of Nursing**
P.O. Box 656
Jefferson City, MO 65102
Taleefanka: (573) 751-0681
Fakiska: (573) 751-0075

**Department of Health and Human Services Office of Civil Rights (Xafiiska Xuquuqda Madaniga ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha)**
601 East 12th Street,
Room 248
Kansas City, MO 64106
Taleefanka: (816) 426-7277
Fakiska: (816) 426-3686

Ama si aad u gudbiso cabasho:
Laynka Tooska ah ee Adeegyada Waayeelka iyo Naafada Taleefanka:
(800) 392-0210

**Khadka Tooska ah ee Xadgudubka iyo Dayacaada Caruurta ee Missouri:** (800) 392-3738

**Xarunta Soo-gudbinta Ilaalinta ee Kansas:**
(800) 922-5330

**Kansas Department of Health and Environment (Waaxda Caafimaadka iyo Bii'ada ee Kansas)**
1000 SW Jackson,
Suite 330
Topeka, KS 66612
Taleefanka: (785) 296-1240
Fakiska: (785) 296-1266

**Kansas State Board of Healing Arts (Gudigga Farshaxanka Daawayn ee Gobalka Kansas)**
235 SW Topeka Blvd.
Topeka, KS 66603
Taleefanka: (785) 296-7413
Fakiska: (785) 296-0852

**Kansas State Board of Nursing**
900 SW Jackson,
Suite 1051
Topeka, KS 66612
Taleefanka: (785) 296-4929
Fakiska: (785) 296-3929

**The Joint Commission**
One Renaissance Blvd.
Oakbrook Terrace, IL 60181
Taleefanka: (800) 994-6610
Fakiska: (630) 792-5005

**Center for Medicare and Medicaid Services (Xarunta Adeegyada Medicare iyo Medicaid)**
7500 Security Blvd.
Baltimore, MD 21244
(800) 633-4227
TTY: (877) 486-2048

(Bukaannada Medicare)
KePRO
(855) 408-8557
TTY: (855) 843-4776



## CHILDREN'S MERCY LAMBARADA GUUD

### Missouri
**Children's Mercy Adele Hall Campus**
(816) 234-3000

### Kansas
**Children's Mercy Hospital Kansas**
(913) 696-8000

### Laynka Xogta Kalkaalisada
(816) 234-3188 ama wicitaanka bilaashka ah
(800) 800-7300

Xogta dheeriga ah ama khayraadka, waxaad booqan kartaa webseedkeena oo ah **childrensmercy.org**.

Children's Mercy
KANSAS CITY

BEST CHILDREN'S HOSPITALS
U.S.News & WORLD REPORT
RANKED IN 9 SPECIALTIES 2023-2024

Children's Mercy waa shirkad bixisa fursad shaqo oo loo siman yahay/cadaalad ah ahna wakaalad ka tirsan United Way.

Copyright © 2023 The Children's Mercy Hospital. Dhamaan xuquuqaha daabacaada waa la ilaaliyey.

23-ACRR-3213 11/23